

Waa bilaash in la Akhriyo

# Sheekada qof walba waa muhiim!

Ma ahan u mid cadaalad ah adiga iyo qoyskaaga marka dadka kale ay isku dayaan inay sameeyaan xeerar ku saabsan waxaad akhrin kartan iyo waxyaabaha iidan akhrin karin iyo waxa aad baran kartaan. Go'aamada akhrinta waa inaad ADIGU gaarto iyo dadka waawayn ee ku daryeela! Marka aad cid la wadaagto aadna akhrido sheekooyin badan oo kala duwan, waxaad baranaysaa waxyaabo cusub, dad cusub, iyo waayo aragnimo cusub—oo maskaxdaada ka dhigaysa mid wayn oo caqli badan!

**Marka ku raaxeyso xornimadaada inaad wax akhriso dhamaan xagaaga!**

Hagaha waxqabadka xagaaga sameeya:

Farshaxamiiste: Nick Alan Foote [www.nickalanart.com](http://www.nickalanart.com)



## Noqo qof wax badan akhriya!

Maxay wadaagaan farshaxanka cajiibka ah, orodyahanka heerka sare, iyo akhristaha aadka wax u akhriya?

### **DHAMMAN WAXAY SAMEEYAAN DHAQAN!**

Ma doonaysaa inaad noqoto farshaxamiiste cajiib ah, oo sameeyo wax soo saaro qurux badan? **DHAQAN!**

Ma dooneysaa inaad noqoto qof jeesa, adoo sameynaaya awood iyo hiddo? **DHAQAN!**

Ma dooneysaa inaad noqoto qof ciyaaraha fudud dheela, oo sameeya kubad laadid kasta? **DHAQAN!**

Ma dooneysaa inaad noqoto qof wax badan akhriyaha? **DHAQAN!**

Halkaan waxaa ku qoran tallaabo-kasta oo kaa caawinaysa inaad noqoto qof wax BADAN akhriyaha:

**Dhaqanka Wax Akhriska: Sabab?** Sababtoo ah akhrisku wuxuu fududeeyaa waxbarashada.

**Ku Dhaqan Dulqaad:** Noqoshada qof ku xoogan akhriska waa hawl! Wuxuu qofku ku xooganaadaa akhriska maalin ka maalin marka uu joogteeyo akhriska maalin kasta!

**Joogtee Hormarka:** Awooda saar inaad 20 daqiiqo wax akhriso maalintii! Taasi waxay noqonaysaa inaad akhrisay 1.8 milyan oo eray sanadkii!

Baro buugaagta Khadka onlaynka ah ama qof kale hakuu akhriyo sidoo kale ka dhig wax akhriskaaga mid "adag"!

## **Akhrisku waxaa loogu talagalay QOF WALBA!**

Booqo makrabadaada deegaanka si aad u hesho kaarka maktabada maanta!

Soo qaado buug-yaraha waxbarashada xagaaga si aad madadaalo u hesho fikrado aad ku sii waddo akhrinta xagaaga oo dhan!

Dadka waawayn iyo dhallintu waxay ciyaari karaan ciyaarta akhriska!

Soo degso aabka maktabada si aad u hesho buugaagta oonleena ah iyo maqalka!

Fiiri majaajilada Hoopla, akhri wargeysyada Flipster, iyo wax badan oo ka badan oo ka akhri [www.spl.org](http://www.spl.org)

# Waan u mahadcelinaynaa Maalgeliyaasheena

 The Seattle Public Library Foundation



Waxbarashada Xagaaga ee 2024 waxaa si deeqsiniimo leh u kafaala qaaday Ururka Maktabada Dadweynaha ee Seattle (Seattle Public Library Foundation), waxaana la qorsheeyay iyadoo lala kaashanaayo South End Stories.

English  
**Every day I will read:**  
\_\_\_\_\_

**BILOW**

Tigrinya  
ኩሉ መዓልቲ  
ከንብብ እየ:

Oromo  
**Ani nan dubbisa guyyaa hundaa:**  
\_\_\_\_\_

**DHAMAYSTIR**

## Ciyaarta ciyaar

### Tilmaamaha:

1. Samayso hadafyo gaarka ah ee akhriska! Waxaan ku tallinaynaa 20 daqiiqo maalintii ama waxaad dooran kartaa yool kuu gaar ah.
2. Ku qor X bokiska afar geeska ah maalin walba ood wax akhriso.
3. Akhri wax kasta ood dooneyso! Waxaad sidoo kale aad dhagaysan kartaa qof akhrinaya ama ka sheekeynaaya sheeko, wax u akhriya walaashaa ama xayawaanka rabaayada ah, ama aad si qaylo ah ula sheekaysan kartaa qoyskaaga.
4. Kadib marka aad calaamadeyso 10 bokiska afar gees, keen buug yaraahan maktabada si magacaaga loogu qoro Darbiga Dadka Guuleystay (Wall of Fame) iyo si aad u qaadato abaalmarin yar!
5. Kadib marka aad calaamadeyso 30 jeer bokiska afar geesta ah, imoow maktabada si aad u qaadato abaalmarintaada Akhriska ee Gaarka ah!

Spanish  
**Leeré todos los días:**  
\_\_\_\_\_

Amharic  
በእያንዳንዱ ቀን እኔ የማንበው:

Chinese  
我每天都会阅读:

Vietnamese  
**Mỗi ngày tôi sẽ đọc:**  
\_\_\_\_\_

Somali  
Maalin kasta waan akhriyi doonaa:  
\_\_\_\_\_